



Gaarsiinta macloomaadka nakh-shadda fikradda ah ee ugu dambeysa ee dekedyarada (Pier) 58 oo kooban

Bilihi Luulyo iyo Agoosto ee 2021, Xafiiska Mashaariicda Biyo-xigeenka (Waterfront) iyo kuwa Madaniga ah ayaa martigeliyay kulanka guriga furan ee internet-ka ka dhacaya si uu ula wadaago dadweynaha nakh-shadda kama-dambeysta ah ee Dekedyarada (Pier) 58 iyo nakh-shadda fikradda ah ee 30% ee musqusha. Gurigan furan ee internet-ka ka dhacaya ma lahan qayb jawaab-celin ah. Ujeeddada laga lahaa guriga furan ee internet-ka ka dhacaya ayaa ahayd in la wadaago nakh-shadda kama dambeysta ah iyo in dadweynaha lagu wargeliyo musqullaha cusub ee loogu talagalay dhammaan jinsiyadaha.

Imaanshaha

- Waxaa jiray 434 adeegsadaayaal gaar ah oo soo booqday gurigeenna furan ee internet-ka intii u dhaxeysay 22-ka Luulyo iyo 16-ka Agoosto, 2021
 - Adeegsadaayaashan soo booqday, 48, 133 iyo 143 waxaa ay sida loo kala hor xusay u booqdeen boggoga Af Shiineeska La-fududeeyay, Af Soomaaliga iyo Af Isbaanishka
- 191 daawasho ee [fiidiyowga soo-jeedinta la hagey](#)

Hordhac

Xafiiska Mashaariicda Biyo-xigeenka (Waterfront) iyo kuwa Madaniga ah ee Magaalada Seattle ayaa nakh-shadeynaya Dekedyarada (Pier) 58, oo sidoo kale loo yaqaanno Beerta Biyo-xigeenka (Waterfront Park), si loo abuuro beer dadweyne, oo loo sii wanaajiyo gaaridda, bedqabka iyo debecsanaanta dekedyarada iyada oo la bixinayo muuqaallada ballaaran ee Gacan-biyoodka Elliott Bay iyo Buuraha Olombik (Olympic Mountains). Beerta dekedyarada (pier) ee cusub ayaa la nakh-shadeeyay iyada oo maanka lagu hayo qoysaska iyo carruurta yaryar, iyada oo leh suuq-weyne guud oo cusub, garoonka ciyaaraha carruurta oo cusub iyo caws ballaaran iyo geedo si ay u bixiyaan hoos.

Cudurka safmarka ah awgii, ayaa dhammaan gaarista waxaa la sameeyay iyada oo la adeegsanayo internet-ka iyo telefoonnda, oo ay ka mid yihiin guriga furan ee internet-ka ah kaas oo furnaa 13-ka Nofembar ilaa 6-da Disembar, 2020. Wawaanna lagu helayay luuqadaha Ingiriiska, Isbaanish, Shiinees La-fududeeyay iyo Af Soomaali. Dadka soo booqday ayaa waxaa la siiyay fursad ay ku daawadaan [fiidiyowlix-daqiqadood soconaya](#) kaas oo bixinaya guudmarka nakh-shadda kama dambeysta ah.

Qalabka ogeysiinta iyo gaariista

Fursaddan ka-qaybqaadashada ayaa kor loo qaaday iyada oo loo marayo hababkan ogeysiinta ee soo socda:

- **Xayysiisada lagu soo bandhigo internet-ka** ee daabacaadaha warbaahinta maxalliga ah oo ay ka mid yihiin South Seattle Emerald, The Stranger, The Daily Journal of Commerce, La Raza NW, Northwest Asian Weekly, International Examiner, ParentMap iyo Seattle's Child iyo xayysiisyo la turjumay oo lagu soo bandhigay wargeesyada Runta News iyo Seattle Chinese Times
- **Warsidaha elektarooniga ah (E-newsletter)** ayaa loo diray 12,377 macaamiil oo rukun u ah liiska iimayl-ka barnaamijka Waterfront Seattle
- **Hadal kooban oo ammaan iyo xayysiin ah oo lagu qoro baraha bulshada** ayaa lagu daabacay koontooyinka baraha bulshada ee Waterfront Seattle, oo ay ka mid yihiin Instagram iyo Facebook
- **Email-lada** loo diray dhagaystayaashii horey loogu sheegay nakh-shadda goobta lagu ciyaaro iyo guud ahaan dekedyarada. Kuwani waxaa ka mid ahaa qoysaska deggan magaalada hoose iyo carruurta, dadka baahiyada gaarista leh, qoysaska dadka madowga ah iyo dadka raadinaya madadaalo qiimo jaban.
- **Daabacaadda bogga internet-ka** ayaa waxaa lagu daabacay bogga internetka Parkways ee Beeraha iyo Madadaallada [magaalada Seattle](#) oo ku saabsan nakh-shadda kama dambeysta ah ee goobta lagu ciyaaro
- **Waxaa isuduway wariyeyaasha maxalliga ah** si ay ula wadaagaan nakh-shadda goobta lagu ciyaaro akhristayaashooda. Cunug reer Seattle ah [ayaa qoray maqaal](#) ku saabsan hannaanka jawaab-celinta goobta lagu ciyaaro.
- Warbaahinta maxalliga ah ee **kala duwan oo ay ka mid yihiin** warbaahinta qowmiyaha ayaa helay ogeysiisyo ku saabsan fursaddan ka-qaybgalka
- **La isuduway iyada oo la kaashanayo ururrada degaanka iyo la-hawlgalayaasha hay'adda**, oo ay ka mid yihiin Ururka Magaalada Hoose ee Seattle (Downtown Seattle Association), Meesha Kalluunka iyo Xayawaan-Badeedka Lagu Xannaaneeyo ee Seattle iyo Waaxda Beeraha ee Seattle si kor loogu qaado fursaddan jawaab-celinta



Xayysiin lagu soo bandhigayo baraha internet-ka oo lagu baahiyay daabacadaha warbaahinta maxalliga ah oo dadka ku jihaynaysa guri Furan oo internet-ka ah.

- Cilmi-baaris ayaa la sameeyay iyadoo la kaashanaya dadka saameynta ku leh baraha bulshada **ee uu qoyska xuddunta u yahay** si ay macaamiishooda ula wadaagaan nakh-shadda kama dambeysta ah ee goobta lagu ciyaaro. Qoraalladooda ka eeg labada bog ee soo socda.

Faallooyinka dadweynaha

Ma helin fursadda jawaab-celin rasmi ah oo ku saabsan nakh-shadda kama dambeysta ah balse waxaan helnay faallooyin ku saabsan qoraallada nakh-shadda goobta lagu ciyaaro oo annaga iyo la-hawlgalayaasheenna bulshada ku wadaagnay baraha bulshada.

Faallooyinka intooda badani waxay ahaayeen kuwo wanaagsan waxaanna jiray dareen farxadeed ku aaddan waxa soo socday. Waxaan helnay tacliyo badan oo la mid ah tusaalooyinkan: "Waxay noqon doontaa meel aad u fiican! Waxaan jeelaanay in aan ku lugeyno goobtaasi carruurta ka hor, sidaa daraadeed ayaa waxaan ku faraxsanahay in ay hadda jiri doonnaan waxyaabo iyaga lala sameeyo!" oo "goobtan lagu ciyaaro waxay u egtahay mid cajiib ah!" Waxaa kaloo jiray dhowr faallooyin iyo su'aalo ku saabsan gaarista, oo ay ku jiraan "Yay!! Waxaa kaloo arkaa inaad soo hadal qaadeen gaaris wanaagsan. Waa jeelto in ay noqoto goob ay ku ciyaari karaan dadka awoodaha kala duwan leh!! Sidee ayay u wacnaan doontaa?!?" oo "Awoodaha kala duwan' macanaheedu ma ahan in goobta lagu ciyaaro loo nakh-shadeeyay qaab 'loo dhan yahay,' taas oo, dabcan, loo baahan yahay in uu yoolka noqdo. Halkan Seattle waxaa ka jirta fursad aad u weyn, marka ay goobtan yeelato. Waa filayaa inaad ka faa'iideysan doontaan."

Halka hoose ka eeg faallooyinka dhammeystiran ee la xiriira nakh-shadda goobta lagu ciyaaro, musqulaha iyo dekedyarada.


Seattle Aquarium •
6d • 5

...

We are so excited to be part of the continued growth and evolution of the Seattle Waterfront! Pier 58 is getting a redesign to create a public park and improve access, safety and flexibility to the pier, while offering expansive views of Elliott Bay and the Olympic Mountains. The new pier park is designed especially with families and young children in mind, with a playground, spaces to relax and a public plaza that will be programmed by Friends of the Waterfront. Learn more: <https://waterfrontseattle.org/waterfront-projects/pier-58>



 You and 189 others
9 Comments • 14 Shares

Meesha Kalluunka iyo Xayawaan-badeedka Lagu Xannaaneeyo ee Seattle ayaa nakh-shadda cusub ee goobta lagu ciyaaro ku wadaagtay Facebook.



Daabacadaha qof saameyn ku leh baraha bulshada



Liked by **waterfrontsea** and **402 others**

helloterumi You can't get more Seattle than playing all day on Seattle's Waterfront. And what if one day there is even a playground here for young kids and families too? AD my family has loved all the new things happening recently on Seattle's #pier62 like this mini soccer field where my kids played near the boats and cruise ships and glistening downtown buildings after we ate takeout in the sun at a table overlooking the water. And now on #Pier58, so close to this spot and located next to @seattleaquarium , there will one day be a marine-themed playground, with spaces to sit and relax and a public plaza that will be programmed by @friendsofwaterfrontseattle . You can learn more about the final design at the online open house: <https://pier58.participate.online/> through Aug 16. Construction is scheduled to begin in 2022 and take about two years to create a safer, more accessible public park with expansive views of Elliott Bay and the Olympic Mountains. It's pretty cool to look at this area and imagine all the great spaces for families that will be here before we know it and it's so incredible to visit here now and watch it come together bit by bit. This is definitely one of our favorite places in Seattle to explore.



Liked by **waterfrontsea** and **others**

kristen.morita #sponsored Anyone else run around town looking like this? Well, good news, Seattle families! There's a new playground coming to the Seattle Waterfront!

The new park will be at Pier 58, in between the aquarium and the Great Wheel (right behind where I'm standing). It is designed especially with families and young children in mind, with a playground, spaces to relax and a public plaza. The final design is posted online at <https://bit.ly/3xDe6eD> and features an 18-foot slide with a four-story jellyfish tower! 🐠

Construction begins late 2022 and is expected to take two years. Go check out the plans online (link in bio) and follow @waterfrontSEA for updates!

Dekedyarada (Pier) 58

Gaarsiinta macluumaadka nakh-shadda fikradda ah ee ugu dambeysa oo kooban



bakerfamadventures
Seattle, Washington

⋮



Liked by **waterfrontsea** and 217 others

bakerfamadventures Hey #seattle did you guys hear about the new playground coming to the Waterfront in Seattle on #Pier58?! My kids love playgrounds and it's a big bonus for us because we frequent the @seattleaquarium and it's right next to that and the @seattlegreatwheel. The playground is designed for young children in mind and will be marine-themed with an 18 foot slide and much much more! It will also have relaxing spaces with amazing views of Elliott Bay and the Olympic Mountains and a public plaza that will be programmed by Friends of Waterfront Seattle.

[AD] Waterfront Seattle is redesigning Pier 58 to create a public park and improve access, safety, and flexibility of the pier. Construction is to begin in late 2022 and will approximately take about two years. To learn more about the final design check out their design: <https://bit.ly/3xDe6eD> (link is also in our bio) The site will be open till August 16th and follow @WaterfrontSEA to get all the new updates!

Faalloyinka dadweynaha ee laga helay warbaahinta bulshada

Jawaabaha laga bixiyay qoraalka daabacan ee Seattle Waterfront

Mareegtada waxay sheegaysaa in goobta lagu ciyaaro ay yeellan doonto "waxyabo lagu ciyaaro oo kala duwan looguna talagalay dhammaan dadka da'aadda iyo awoodaha kala duwan." Miyaad faahfaahin dheeraad ah ka bixin kartaa nooca walxaha lagu dari doonno ciyaarta loo dhan yahay? Adeegsadaayaasha kursiga naafada ee lugaha wareegga leh ma waxay awoodi doonnaan in ay ciyaar ka qaybgalaan iyagoo kursiga saaran, amase qaybaha nakh-shadda waxay u baahan yihin in la wareejiyo? Ma jiraa saamiga loo siman yahay ee qaybaha ciyaarta sida buuxda loo heli karo ee lagu dari doonno nakh-shadda kama-dambeysta ah? Uma muuqato in qayb kasta oo ka mid ah dhismaha la fuulo in ay gaari karaan adeegsadaayaasha kursiga naafada ee lugaha wareegga leh, sidaa daraadeed ayaa waxaan la yaabannahay sida goobtan lagu ciyaaro ay u dhiirrigelin karto u-dhammaashaha? Miyaad maskaxda ku haysaan waxyabo badan oo ka mid ah qaybaha lagu ciyaaro ee dhulka la siman? "Awoodaha kala duwan" macanaheedu ma ahan in goobta lagu ciyaaro loo nakh-shadeeyay qaab "loo dhan yahay," taas oo, dabcan, loo baahan yahay in uu yoolku noqdo. Halkan Seattle waxaa ka jirta fursad aad u weyn, marka ay goobtan yeelato. Waxaan filayaa in aad ka faa'iideysan doontaan.

Bal hadda qiyaas degsiimooyin teendho ah iyo qashin sababta oo ah rajo kama qabo in dowladeenna hoose ay diyaar u tahay in ay Seattle ka dhigto meel loogu talagalay dadka deggan, oo ku ciyaaraya waxyabahan, si ay ugu raaxaystaan.

Ku saabsan nakh-shadda musqusha: Mareegtada ayaa sidoo kale sheegaysa in tas-hiilaadyada loo nakh-shadeeyay si "loo hubiyo in tas-hiilaadka ay adeegsan karaan dhammaan dadka da'aadda iyo awoodaha kala duwan leh." Waxaan u malaynayaa in ay ku jiraan miisaska dadka waaweyn iyo carruurta ee cabbirkooda is-beddella, iyo sidoo kale musquollo loogu talagalay qoyska oo si buuxda loo heli karo. Si faahfaahsan ma u sharxi kartaa dhinacyadan nakh-shadda?

Jawaabaha laga bixiyay qoraalka daabacan ee Seattle Aquarium

Meeshan waan jeclahay. Qoysasku ma heli karaan beero ama jardiinno badan iyadoo sabab u ah degsiimooyinka dadka hoy la'aanta ah. Fadlan fadlan taa biyo-xigeenka ka fogee. Mid fiican ka dhig. Sida Point Ruston.

Walaaceygu waa in dadka adeegsada mukhaadaraadka meth in ay la wareegi doonnaan beerta cusub.

Waxa kaliya ee aan arko waa meel cusub oo dadka mukhaadaraadka qabatimay ee hoy la'aanta ah ay sheegtaan in ay iyagu leeyihii.

Nakh-shadani waxay u egtahay mid cajiib ah! Nasiib wacan ayaan idin leeyahay dedaalka aad wadaan! 😊 ❤️

Aad ayay u fiican tahay!! Waxaan sugi la ahay in aan arko mashruuca oo dhammaadey!!! :) :)

Jawaabaha la siiyay @helloterumi

Waxaan jeclahay biyo-xigeenka Seattle - waan sugi la ahay in aan ku noqdo (waxaan rajeynayaa sannadka soo soco)

Waa biyo xigeen aad u fiican!

Meel wanaagsan ayay u egtahay.... dhowaan ayaan aadi doonaa si aan u soo arko!

Meel la jeclaysto ayay u egtahay! Waa sawir aad u fiican!

Magaalada Seattle waa meel cajiib ah! ❤️ ❤️ ❤️ ❤️

Waa meel cajiib ah!!

Waa meel lagu maaweelo. Biyo-xigeenku waan jeclahay 😊

Waxay u egtahay meel maaweelo badan leh! Waxaan si wanaagsan u xusuustaa carruurta oo agagaarka halkan dekedyarada ku dheelaya markii ay yaryaraayeen 😊

Waxay u egtahay meel maaweelo badan, iyo aragtidaasi leh 😊 😊 😊

Tani waxay u muuqataa mid xiiso badan leh ❤️❤️❤️

Waa meel aad u wanaagsan! Waxaan rajeynaynaa in aan dhowaan soo gaarno magaalada Seattle

Waxaan rabaa in aan soo noqdo. Waan u xiisay!

Jawaabaha la siiyay @kristen.morita

Goobtan lagu ciyaaro waa mid cajiib ah! 😊

Waxay noqon doontaa meel aad u fiican! Waxaan jeelaanay in aan ku lugeyno goobtaasi carruurta ka hor, sidaa daraadeed ayaa waxaan ku faraxsanahay in ay hadda yeellan doonnaan waxyaabo iyaga lala sameeyo!

Waa cajiib

Waah! Waxay u egtahay mid aad u fiican 😊

Aaaw waa mid maawelo leh!! Idinkana waxaad u egtihiiin kuwo aad qurxoon! 😊

Ma sugi karo in aan dib u booqdo Seattle! Anniga oo aad u yar ayaa iigu dambeysay. Xusuus ayay igu dhalisay!

Jawaabaha la siiyay @bakerfamadventures

Waa meel fiican! Ma aanana ogeyn!

Dhowaan ayaan meesha joognay! Meeshu waa meel qurux badan ❤️

Waxay u egtahay meel cajiib ah! Waxaan ❤️ Seattle.

Alla meeshu fiicnaa! Gabdhahaygu way jeelaan lahaayeen 🙏

Alla waa meel aad u xiiso badan! Seattle waan jecelnahay laakiinse muddo ma tagin.

Yay!! Waxaa kaloo arkaa in aad soo hadal qaadeen gaaris wanaagsan. Waxaan rajeynayaa in ay noqoto goob ay ku ciyaari karaan dadka awoodaha kala duwan leh!! Taasi sidee ayay u fiicnaan lahayd?!?